**Degmada San Diego, Adeegyada Qorshaynta & Horumarinta,**
# GURYAHA DEGANAANSHAHA EE DHEERAADKA AH & GURYAHA DEGANAANSHAHA EE DADKA YARYAR
***WAAXDA AAGAYNTA***

Sharciga gobolku waxa uu ogolyahay in **guriga deganaanshaha ee Dheeriga ah (ADU)** iyo/ama hal **Guri oo Guryaha Deganaanshaha Dadka Yaryar ee Dheeriga (JADU)** lagu daro guryaha loo qoondeeyay isticmaalka deegaamaynta kaas oo bixinaya tas-hiilaad nololeed oo dhamaystiran oo loogu talagalay hal qof ama in ka badan oo leh guryo loogu talagalay hal qoys guryahaas oo hore u jirey ama hadda la soo jeediyay (SFD).

Codsadayaasha waxaa si xoog leh loogu dhiirigelinayaa inay la xiriiraan Waaxda Dabka ee ku habboon sida ugu dhakhsaha badan si loo xaqiijiyo in ADU ay u hoggaansanto wixii dhibaato dab la xiriira keeni kara ee loo baahan yahay iyo si loo ogaado haddii rusheeyaha dabka loo baahan yahay iyo in kale.

**Haddii dhismahaaga uu ku dhex yaalo degmada, hal ADU iyo hal JADU ayaa laga yaabaa in loo ogolaado** dhulalka leh SED hore u jirey ama hadda la soo jeediyay (kaas oo ku yaala gudaha deegaanka ama aaga isticmaalka isku dhafan) waase haddii la buuxiyo dhammaan shuruudahan soo socda:

- ADU uu ku xiran yahay SFD hore u jirey ama uu ka go'an yahay ayna ku wada yaaliin isla hal dhul.
- ADU la kiraysan karaa laakiin aan loogu talagalin iib gooni ka ah guriga aasaasiga ah.
- Jeexa dhulka aanu lahayn guryo horey u jirey oo loogu talagalay martida, meelo dheeraad ah oo lagu noolaado, ama abaartimentiyo dheeri ah. In guryaha martida, meelaha lagu noolaado eecdheeraadka ah, ama abaartimentiyada dheeraadka lagu bedelo ADU ay suurtogal tahay in la oggolaado ayna u baahan tahay in la helo oggolaanshaha dhismaha.
- Wadarta bedka dhulka ee ku xiran ADU waa in aanu dhaafin 50% bedka dhulka SFD, ilaa ugu badnaan bedka sagxadda 1,200 fiit ee laba jibaaran (waxa ay noqon kartaa ilaa 850 fiit oo laba jibaaran iyo 1,000 fiit oo laba jibbaaran oo loogu talagalay ADU-yada leh in ka badan hal qof oo jiif, oo ka madax banaan SFD-ka horey u jirey ee fiit laba jabbaaran ah).
- Wadarta bedka dhulka ee ku xiran ADU waa in aanu dhaafin 1,200 fiit oo laba jibbaaran, oo ka madax bannaan dhulka cabirkiisa laba jibaaran ee SFD-da hore u jirey ah.
- Codsadayaashu waa inay bixiyaan xisaabinta "dhulka sagxada ah" ee labada guryoodba iyagoo ku qoraya qorshooyinka balootka, xisaabintan waa in laga soo qaataa cabbirrada dibadda ee dhanka bannaanka ah ee derbiyada.
- Wadarta bedka sagxadda dhismaha la soo jeediyay ee ku dheggan ADU waa in aanay dhaafin cabirka labajibbaaran ee la ogol yahay ee qaybta 6156.g ee Sharciga Deegaamaynta, marka laga reebo haddii uu soo ogglaaday Maamulka Ogolaansho bixinta ee la ansixiyay.
- Qaab dhismeed kasta oo la soo jeediyo, oo ku dheggan ADU, oo dhaafaya 1,000 fiit oo laba jibbaaran (oo lagu daray dhammaan qaab-dhismeedyada kale ee dheeraadka ah ee Qaybta 6156.g) iyo/ama in ka badan 12' dherer ah, waxay hoos imanayaan dib u dhaca dhismaha aasaasiga ah iyo xeerarka dhererka Sharciga Degaanaynta.
- Barxad ku dheggan ama ka go'an, sagxad, iyo/ama balakoon waxay hoos imaanayaan Qaybta 4835 ee Sharciga Deegaanaynta.
- ADU ka go'an wuxuu ku xaddidan yahay 24' oo dherer ah (marka laga reebo dhismooyinka qoysaska badan degan).
- ADU waxa suurto gal ah in lagu dhejiyo dhisme hore u jirey oo la ogolyahay in lagu daro qaab dhismeedka agabka dheeriga ah, hadii ADU lagu meeleeyo qaab dhismeedka qalabaynta ee hore u jirey isla markaana raadka guud ahaaneedna aan la bedelin.
- Wax dib u dhac ah looma baahna haddii qaab dhismeed hore u jirey oo la oggolaaday, ama qayb ka mid ah loo beddelayo ADU, marka laga reebo badbaadada dabka.

**Fadlan guji halkaan si aad u hesho macluumaadka aagaynta haddii gurigaaga uu ku yaalo aagga aan la wadaagin ee Degmada San Diego.** Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo dheeraad ah oo la xiriira aagyanta, fadlan iimayl noogu soo dir PDSZoningPermitCounter@sdcounty.ca.gov

- Looma baahna heerar dhismo oo dheeri ah sida xeerka masaafada labajibbaaran ee ugu badan, dhererka, baaxada dhulka, iyo in dib u dhac loo baahan yahay haddii qaab dhismeed dheeri ah oo hore u jirey oo la oggolaaday loo beddelayo ADU. Wax kasta oo cusub oo lagu soo kordhinayo ADU waa in ay u hoggaansamaan xeerarka dib u dhaca iyo xeerarka dhererka ee lagu sheegay foomkan.

- Qaab dhismeed dheeraad ah oo hore u jirey isla markaana la ogolyahay, ama qayb ka mid ah dhulka weyn ee deganaanshaha ee hore u jirey isla markaana la oggolaaday waxaa loo bedeli karaa ADU. Beddelka noocan oo kale ah laguma xiri doono wax shuruudo xagga cabbirka ah. Tusaale ahaan, dhismaha keydka ee hore u jirey lana oggolyahay ee ah 3,000 fiit oo laba jibbaaran ayaa loo bedeli karaa ADU iyada oo aan wax shuruudo ah oo dheeraad ah la isaga baahnayn, oo aan ka ahayn u hoggaansanaanta heerarka dabka iyo dhismaha ee loogu talagalay guryaha deegaanka ah.

- Waxa suurtogal ah in ADU lagu dhejiyo qol hore u jirey oo la ogolyahay, ama qolka madadaalada ee la soo jeediyay, haddii uu jiro darbi ama sagxad kala soocda dabka iyo dhawaaqa oo u dhexeeya ADU iyo qolka madadaalada. Wixii duleelo ah (albaab, daaqad, ama galitaanka) ayaa loo baahan doonaa in laga qiimeeyo xagga dabka.

- Dib u dhaca ugu yar ee ugu yaraan 4' ah ee dhinaca, dhinaca dibadda, iyo laymanka gadaale ayaa looga baahan yahay ADU kaas oo laga dhisayo qeybta ka sareeysa qaab dhismeed go'an oo la oggol yahay. Heerka dib-u-dhacyadu waxay khuseeyaan oo keliya booska dheeriga ah ee ka sarreeya qaab-dhismeedka dheeraadka iyo ADU-gana waxaa qeyb ahaan ama si dhamaystiran looga dhisi karaa qeybta ka sarreeysa qaab-dhismeedka dheeraadka ah, oo ay ku jirto in la dhaafsiiyo derbiyada qaab dhismeedka dheeraadka ah.

- Dhammaan ADU-yada cusub ee la dhisay isku dhegan iyo/ama kala go'an waa inay u hoggaansamaan heerarla dib u dhacyada dayrka hore ee loo baahan yahay iyo dhinaca ugu yar, dhinaca dibadda ah, iyo dib u dhaca danbe ee ugu yaraan 4' ah (marka laga reebo dib u dhacyada dabka ee loo baahan yahay). Si kastaba ha ahaatee, qaab-dhismeedka kaabayasha, ama barxadda ku dheggan ADU waa in ay u hoggaansamaan heerka dib u dhaca dayrka dhinaca bannaanka ah ee loo baahan yahay.

- ADU waa inay bixisaa hal meel oo baabuurta la dhigto. Goobta baarkinku waxa laga yaabaa inay ku dhex taalo dib u dhacyada iyo wadada baabuurta ee hore u jirey sida baarkinka baaskiilada. Goobaha baarkinka looma baahna in la badalo marka garaash, gawaari, ama qaab dhismeedka baarkinka daboolan la dumiyo iyadoo lala kaashanayo dhismaha ADU ama loo bedelo ADU.

- Goobta baarkinka loogama baahna ADU marka ay jiraan mid ka mid ah xaaladaha soo socda:
  (1) ADU uu ku yaalo meel nus mayl u jirta gaadiidka dadweynaha.
  (2) ADU uu ku dhex yaalo degmo taariikhi ah oo dhismo ahaan iyo taariikh ahaanba muhiim ah.

- Iibinta goonida ah ama lahaanshaha ADU ay tahay mamnuuc, marka laga reebo haddii dhulka aan la qaybsanin taas oo keenaysa in guri kastaa uu yeesho dhul gooni ah.

- ADU waa in aan la isticmaalin ama la kiraynin wax ka yar 30 maalmood.

- Guryaha leh dhowr SFD (2 ama ka badan) oo hore u jirey isla markaana ay ku yaaliin aag la deggan yahay oo kaliya oggolaanaya SFD, isla markaana yeelan kara ADU ama JADU (aanan labadaba isku yeelan karin).

- Guryaha leh SFD oo hore u jirey isla markaana ay ku yaaliin aag oo kaliya oggolaanaya SFD, isla markaana yeelan kara ADU ama JADU (aanan labadaba isku yeelan karin).

- ADU-yada cusub oo la soo jeediyay ee **dhulalka ku yaala aagagga aan la wadaagin ee degmada** kuwaas oo SFD hore u jirey ee la oggol yahay ayaa laga yaabaa inay u qalmaan Barnaamijka Ka Dhaafitaanka Khidmada ee Degmada (ilaa Janaayo 2024). Fadlan eeg linkigan soo socda: https://www.sandiegocounty.gov/ADU.

**Fadlan guji halkaan si aad u hesho macluumaadka aagaynta haddii gurigaaga uu ku yaalo aagga aan la wadaagin ee Degmada San Diego.** Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo dheeraad ah oo la xiriira aagyanta, fadlan iimayl noogu soo dir PDSZoningPermitCounter@sdcounty.ca.gov

**Hoos ka eeg shuruudaha Guryaha Deegaanka ee Dheeraadka Ah ee Yaryar (JADU):**

- Hal JADU oo ku dhegan iyo hal ADU oo ka go'an, ayaa laga yaabaa in loo ogolaado dhulalka leh SFD hore u jirey ama la soo jeediyay oo ku dhex yaal aag la deggan yahay ama la isticmaalo.
- JADU-ga waa inuu si buuxda ugu dhex yaalo gudaha SFD ee hore u jirey ama la soo jeediyay waana in uu leeyahay musqul dhamaystiran.
- JADU macneheedu waa xarun deegaaneed oo madax banaan oo dhamaystiran waana inaan ka badnayn 500 fiit oo laba jibbaaran.
- JADU waa inay ku jirtaa jikada waxtarka leh, oo ay ku jiraan dhammaan waxyaabahan soo socda:
  a. Meel wax lagu kariyo oo leh qalabyo.
  b. Miisaska cuntada lagu diyaariyo iyo armaajooyinka alaabta lagu keydiyo oo leh cabbir macquul ah marka loo eego cabbirka qaybta guriga ee dheeriga ah.
- Meel baarkin ah oo dheeri ah looma baahna.
- JADU-yada, iyo/ama waxyaabaha lagu kordhiyey JADU-yaada waa inay u hoggaansamaan heerarka dib-u-dhacyada ee dhismaha weyn, oo ay ku jiraan waxyaabaha lagu kordhiyey JADU ee SFD ee aan waafaqsanayn. Fadlan ka eeg Qaybta 6886 ee Xeerka Deegaanaynta wixii macluumaad ah ee la xiriira heerka dib u dhaca ee SFD aan waafaqsanayn.
- JADU waa la kireysan karaa, laakiin waa inaan ka yarayn 30 maalmood, loogumana talogelin in loo iibiyo si gooni ah oo ka baxsan guriga aasaasiga ah. Milkiilaha waxaa looga baahan yahay inuu ku noolaado mid ka mid ah labada qaybood.
- JADU waa inuu isticmaalo adeegaa biyaha, bulaacada, iyo tamarta kale ee u guriga aasaasiga ah isticmaalayo, cabir koronto oo gooni ah lama ogolaan doono.

**ADU-yada badan ayaa laga oggolaan karaa qaybo ka mid ah dhismooyinka qoysaska badan ee hore u jirey kuwaas oo ku dhex yaala aag la deggan yahay ama isticmaalka isku dhafan leh haddii shuruudaha soo socda la buuxiyo.**

- Keliya qaab-dhismeedka/qolalka ka dhex yaala dhismaha qoysaska badan loogu talagalay ee hore u jirey ee aan loo isticmaalin meel lagu noolaado ahaan, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, qolalka kaydinta alaabta, qolalka kuleyliyaha, marinnada, saqafyada, saqafyada hoose, ama garaashyada, ayaa suurtogal ah in loo bedelo ugu yaraan hal ADU, ama ADU-yo badan, ilaa 25% ee guryaha hore u jirey ee loogu talagalay qoysaska badan.
- Ilaa laba ADU oo go'an ayaa laga yaabaa in la oggolaado, halkii jeex oo dhul ahba kaas oo leh dhismo qoys oo badan oo hore u jirey haddii shuruudaha soo socda la buuxiyo.
  a. ADU-yada go'an ay ku xaddidan yihiin dhererka 16 fiit iyo 4' dayrka dambe ah iyo dib-u-dhacyada dhinaca ah.
  b. Ku-daritaanka labada ADU ee go'an kuma xirna wax sharciyo ah oo aan waafaqsanayn.
  c. Dhismaha qoysaska badan loogu talagalay ee aan waafaqsanayn waxay yeelan karaan ilaa laba ADU oo go'an ama waxayna sidoo kale yeelan karaan ADU-yo laga dhiso gudaha dhismaha qoysaska badan loogu talagalay ee hore u jirey (labadaba la iskuma heli karo) waxayna hoos imaan doonaan dhammaan xeerarka kale.
- ADU-yada badan oo loogu talagalay dhismooyinka qoysaska badan leh uma qalmaan Barnaamijka Ka Dhaafitaanka Khidmada Degmada.

Qaab dhismeed kasta oo loogu talagalay in lagu noolaado oo loo qaybiyo laba ama in ka badan oo guryo madax bannaan oo isku dhegan ah oo ku yaala hal jeex oo dhul ah waxa loo tixgaliyaa dhismo loogu talagalay qoysas-badan (sida laba-dabaqle, saddex dabaqle, guryo is dulsaaran, Guryaha Guurguura, iwm.). Guryada badan oo gooni-goonida ah ee loogu talagalay hal qoys ee ku yaala hal jeex oo dhul ah looma tixgalinayo inay yihiin dhismo loogu talagalay qoysas badan laakiin waxay u qalmi karaan hal ADU ama hal JADU (labadaba ma isku darsan karaan).

**Fadlan guji halkaan si aad u hesho macluumaadka aagaynta haddii gurigaaga uu ku yaalo aagga aan la wadaagin ee Degmada San Diego.** Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo dheeraad ah oo la xiriira aagyanta, fadlan iimayl noogu soo dir PDSZoningPermitCounter@sdcounty.ca.gov